

**15 Janaayo 1964 ee Xeerka Shaqada iyo xilsaarashada xukuumada
Sharci 9 Janaayo 1964, lamba. 2**

**Ballaarinta Xeerka Shaqada iyo wakiilashada Xukuumadda ee ku saabsan soo saaridda
xeerarka la cusboonaysiinayo, is-dhexgalka iyo fulinta.**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Markuu qiray ansixinta Golaha Shacabka;

Wuxuu sharciyay

Sharciga soo socdo:

Qod. 1

Xeerka Shaqada, kordhinta Xeerka Shaqada iyo u xilsaarashada Xukuumadda in ay soo saarto xeerar ay wax ku cusbooneysiineyso xeerar, ama xeer isdhexgal iyo mid ay wax ku hirgelineyso oo lagu ansixiyay Xeer-Sharci 15 Novembar 1958 lamba. 25 iyo isbelladii lagu sameeyay Sharciga 23 Maajo 1961 lamba. 17, waxaa lagu baahinayaa dhamaan dhulka dawladda oo dhan marka laga bilaabo 31 Maarso 1964.

Qod. 2

Xukuumadda waxa loo igmaday in ay soo saarto muddada uu tilmaamayo qod. 1 ka dib markii la dhagaysto Guddi uu hogaaminayo Wasiirka Wasaaradda. Caafimaadka, Xanaanada Xoolaha iyo Shaqada oo ka kooban shan xubnood oo ay soo doorteen Xafiiska Golaha Shacbiga, shan khabiir oo uu soo magacaabay Wasiirka Caafimaadka, Xanaanada Xoolaha iyo Shaqada iyo afar wakiil oo ay soo doorteen ururrada shaqaalaha ee gaarka ah, dib u cusboonaysiinta xeerarka, isku dhafka iyo hirgelinta Xeerka aan kor ku soo xusnay.

Qod. 3

Qoraal midaysan oo ah xeer shaqo waxa soo saarayo Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka, Xannaanada Xoolaha iyo Shaqada muddo lix bilood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ku xusan qodobka 2aad ee xeerkan-sharci.

Qod. 4

Xeerkani waxa uu dhaqan galayaa maalinta ku xigta maalinta la soo daabaco. Sharcigan waxaa lagu dari doonaa Ururinta Rasmiga ah ee Sharciyada waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Cid kasta oo mas'uul ka ah waxa ku waajib ah in ay ilaaliso oo ay u ilaaliso sida Sharciga Jamhuuriyadda.

Muqdisho, Janaayo 9, 1964.

Aden Abdulla Osman

Ra'iisul Wasaare

Cabdi-Rashiid Cali Shermarke

Wasiirka Caafimaadka, Xanaanada Xoolaha iyo Shaqada

Maxamuud Axmed Maxamed Addan